

Hageyaasha dhammaystirka Foomka Cashuurta Dakhliga Kirada

“**Dakhliga Kirada**” Waxa loola jeedaa wadarta guud kirada ee uu qofku ka helo muddada sanad dakhliyeedka kirada hantida ma guurtada ah ee uu ku leeyahay Somaliland dhexdeeda. Si waafaqsan Xeerka dakhliga, cashuurta dakhliga kirada waxa la qaadaa sanad kasta oo dakhli waxaanay waajib ku tahay qof kasta oo dakhli kiro soo galo sanadkii.

Cashuurta uu bixinayo qofku sanad dakhliyeedka waxa la xisaabinayaa iyada oo la adeegsanayo boqolkiiba tobanka (10%) xaddiga kirada ee uu helo qofku sanadkii si waafaqsan qodobka 57aad faqradiisa 2aad. Kirada uu helo qofku laguma darayo dakhliga guud ee kale ee qofka ee ay ku waajibtay cashuurta dakhligu. Jaritaannada kaliya ee laga jarayo wadarta dakhliga kirada ee la ogolyahay waa kuwa lagu sheegay qodobka 73aad faqradiisa 1aad xarafka (b) taas oo la xidhiidha jaritaannada ka dhashay burburinta hantida kirada- wax jaritaan ah lama ogolo kharashaadka caadiga ah ee la galo marka la samaynayo dakhliga kirada.

Hageyaasha dhammaystirka Foomka Cashuurta Dakhliga Kirada

Muddada cashuurta: Gali khaanadan sanadka xisaab celinta cashuurta dakhliga kiradu ku saabsantahay.

Taariikhda la bixinayo: Taariikhda la bixinayaa waa 30ka bisha April (ama maalinta ku xigta ee shaqo haddii taariikhda la bixinayaa ku hagaagto maalin jimce ah ama fasax guud)

Qaybta A: Faahfaahinta Mulkiilaha

Magaca cashuurbixiyaha: Sheeg magacaaga oo u qoran sidii aad u qortay markii aad lambarka aqoonsiga cashuurta aad isku diwaangalinaysay.

Lambarka aqoonsiga cashuurta (TIN): Gali khaanadan lambarka aqoonsiga cashuurta kaas oo ah lambarka kaliya ee aqoonsiga ee ay kuugu soo saareen ujeedooyinka ka warbixinta cashuurta maamulka cashuurtu.

Ciwaanka: Gali khaanadan meesha aad degantahay ee aad sheegtay markii aad cashuurta isku diwaangalinaysay ama meesha aad hadda degantahay haddii aad bedeshay meeshii aad hore u sheegatay.

Xaafadda: Gali khaanadan magaca xaafaddaada aad degantahay.

Lambarka Telfonka gacanta: Gali khaanadan lambarka telfoonkaaga rasmiga ah ee shaqaynaya ee ay maamulka cashuurtu kaala soo xidhiidhi karaan.

Ciwaanka E-mailka: Gali khaanadan ciwaankaaga emailkaaga rasmiga ah ee aad sheegtay markii aad diwaangalinaysay cashuurtaada ama ciwaanka emailkaaga ee hadda haddii aad bedeshay.

Qaybta B. Xisaabinta Cashuurta Dakhliga Kirada (Qod. 56aad).

B1-Tirrada kiraystayaasha: Gali khaanadan tirada dadka hantida kaa kireeyey.

B2-Tirada hantida la kireeyay: Gali khaanadan tirada hantida aad kiraysay sida guryaha la deganyahay, qololka gaar gaarka ah, dukaamada, xafiisyada, dhulka iwm.

B3- Wadarta dakhliga kirada ee sanadlaha ah: Gali khaanadan wadarta dakhli ee aad ka heshay kirooyinka si waafaqsan kolomka (column) J ee lifaaqan.

B4-Waxyaabaha laga jarayo ee ka dhashay burburinta hantida kiraysan: Gali khaanadan khasaaraha raasamaal ee saafiga ah, haddii uu jiro, ee ka dhashay burburinta hantida kirada ah si waafaqsan Qodobada 56 aad faqrada 1aad xarafka (b) iyo 73aad faqrada 1aad (b).

B5- Dakhliga saafiga ah kirada cashuurtu ku waajibtay: Gali khaanadan saafiga dakhliga kirada ee cashuurtu ku waajibtay sanadka kadib marka laga jarro dhammaan kharashaadka iyo khasaaraha la galay sanadka (B3 laga jaray B4).

B6 Cashuurta dakhliga kirada ee la bixinayo: Gali khaanadan boqolkiiba toban (10%) ee saafiga dakhliga kirada sanadlaha ah ee cashuurtu ku waajibtay (adeegso 10% ka B5) oo noqonaysa cashuurta dakhliga kirada ee sanadka.

B7-Cashuurta maamulka: Gali khaanadan boqolkiiba laba (2%) cashuurta dakhliga kirada sanadlaha ee la bixinayo (2% ka ah B5).

B8-Cashuurta shaanbada: Gali khaanadan boqolkiiba laba iyo badh (2.5%) cashuurta dakhliga kirada ee la bixinayo oo loo geeyay cashuurta maamulka (adeegso 2.5% (B6 loo geeyay B7).

B9-Wadarta cashuurta la bixinayo: Gali khaanadan wadarta cashuurta la bixinayo oo ah isku darka B6, B7 iyo B8 (B6 + B7 + B8).

Qaybta C: Caddaynta uu bixiyo Cashuurbixiyuhu ama Wakiilkiisu

Magaca cashuurbixiyaha/wakiilka oo dhan: Gali khaanadan magaca cashuurbixiyaha ama wakiilkiisa oo dhammaystiran.

Kaalinta: Khaanadan gali in caddaynta uu saxeexay cashuurbixiyaha ama wakiilkiisu

Saxeexa iyo shaanbada: Gali khaanadan saxeexa cashuurbixiyaha ama wakiilkiisa iyo shaanbada.

Taariikh: Gali khaanadan taariikhda xisaab celinta uu saxeexay cashuurbixiyahu ama wakiilkiisu.

Qaybta D: Isticmaalka Rasmiga ah oo kaliya (Maamulka Cashuurta)

Xarunta cashuurta: Gali khaanadan xarunta cashuurta (xafiiska waaxda cashuuraha berriga) ee maamulaya faylka cashuurta dakhliga kirada.

Lambarka Juwanka Guud (GR number): Gali khaanadan lambarka juwanka khaanada loo banneeyay.

Cashuurta Ganaaxa: Gali khaanadan xaddiga cashuur ganaax ah ee ka waajibtay xadgudubka cashuurta sida la aqoonsaday.

Khidmadaha laga bixiyo lacagaha lala daaho: Gali khaanadan xaddiga khidmada laga bixiyo lacagaha lala daahay ee la saaray cashuurta aan la bixin.

Cashuurta Guud ee Waajibtay/labixinayo: Gali khaanadan cashuurta guud ee waajibtay (Cashuurta ganaaxa+ khidmadaha laga bixiyo lacagaha lala daaho+ cashuurta waajibtay).

Taariikh: Gali khaanadan taariikhda cashuur celinta uu buuxiyay cashuurbixiyaha ama wakiilkiisu.

Magaca Sarkaalka Qabtay Cashuur Celinta: Gali khaanadan magaca sarkaalka qabta cashuur celinta oo dhammaystiran.

Saxeexa iyo Shaanbada: Khaanadan, saxeex foomka shaanbadeena foomka cashuurta dakhliga kirada.